

QIIMAHA MUHIIMKA AH

Dugsigeena dadweynuhu waa meel ardayda, shaqaalaha iyo qoysaska la qiimeeyo isla markaana la ixtiraamo. Waxaan si wadajir ah uga shaqeynaa bixinta jawi badbaado iyo soo dhaweyn leh halkaasi oo ardayda oo idil ay horumar wanaagsan sameeyaan isla markaana jecel yihiin in ay wax bartaan!

HAWSHA

Arday kasta, iyada oo aan loo eegayn qowmiyadda, dakhliga waalidka, kala duwanaanshaha dhanka barashada, dhaqanka, ama luqadda hooyo, wuxuu noqon doonaa mid si fiican wax u akhriya isla markaana aqoon sare u yeesha xirfadaha tacliimeed iyo aqooneed ee lagama maarmaanka u ah in la guuleysto heerka dugsi ee xiga.

Machadka Arthur takoorid kuma sameyso mid kasta oo ka mid barnaamijyadiisa, nidaamyadiisa, ama sida wax loo qabto kaasi oo ka dhan ah qof kasta iyada oo ay la xiriiro da'da, dhalashada, midabka, naafanimada, dalka laga soo jeedo, xiriirka siyaasadeed, jinsiyadda, diinta, dookha galmo, xaaladda qofka soo halgama, ama sifoonka kale ee uu dhowrayo sharcigu.

Portland Arthur Academy
7507 SE Yamhill Street, Suite B
Portland, OR 97215
503-257-3936
sspreadborough@arthuracademy.org
www.arthuracademy.org

**Ku soo dhowow
Machadka
Arthur ee
Dugsiga
Dadweynaha
Madaxa
bannaan ee
Portland**



Portland Arthur Academy
7507 SE Yamhill Street, Suite B
Portland, OR 97215
503-257-3936
sspreadborough@arthuracademy.org
www.arthuracademy.org



XAQIIQOYIN DEGDEGA AH:

- Waxaa la furay 2005
- Wuxuu u adeegayaa fasallada K-5
- Waa jawi dugsi oo yar
- Awoodda isqorista guud waa 180 arday ugu badnaan
- Tacliin ahaan-diiirada saara dugsiga hoose ee dadweynaha

Ma daneynaysaa in aad isqorto?

Fadlan booqo:
www.arthuracademy.org

wixii macluumaad ah.

Habka Waxbarashada

Machadka Arthur ee Dugsiyada Madaxa Bannaan wuxuu isticmaalaa hab waxbarasho oo sareeya, aad u wanaagsan oo loogu talagalay wax akhriska, xisaabta, luqadda iyo wax higaadinta kaasi oo laga helo barnaamijyo taxane ah oo faahfaahsan, oo loo yaqaan Waxbarashada Tooska ah.

Habkan gaarka ah ee ku aadan wax barida maaddooyinka aasaasiga ah wuxuu ku saleysan yahay qaab waxbarasho oo dhammeystiran. Qaabkayagu wuxuu muhiimad siinayaa casharro si fiican loo dejiyay oo si taxadar leh loo qorsheeyay, oo loogu talagalay kordhinta waxbarashada yar iyada oo la amray in loo isticmaalo hawlaha dhanka waxbarida. Waxbarashada waxaa loo qorsheeyaa si aad u sareysa si ardaydu u arkaan in waxbarashadu fududahay, sidaa darteed, waxay ku guulaysan karaan in ay aqoon sare u yeeshaan wax kasta oo la baray inta ay ku jiraan horumarka ay ka gaarayaan barnaamijyada.

Qaabkayagu waa hab wax barid oo sidoo kale qeexaya kala doorashada bannaan ee dugsigayaga madaxa bannaan. Bixinta qaabkani wuxuu ku saleysan yahay aaminsanaanta ah in uu jiro hab wax barid oo awood leh oo aanay isticmaalin dugsiyada badankoodu, sidaa darteed dugsiyadayada madaxa bannaan ayaa bixiya tani isaga oo ah midka la doorto.

Waa maxay dugsiga madaxa bannaani?

Dugsiyada madaxa bannaan waa dugsiyo dadweyne oo loogu talagalay in ay bixiyaan barnaamijyo casri oo leh falsafado waxbarasho oo gaar ah iyo/ama bixinta tusaalooyin laga helayo fursado dheeraad ah oo loogu talagalay ardayda iyo qoysaska ka tirsan nidaamka dugsiga dadweynaha. Dugsiyada madaxa bannaani waa urur ah 501(c)3 oo qandaraas la gala Dugsiyada Dadweynaha Portland si ay u damaanad qaadaan isla markaana u dhowraan madax bannaani heerkoodu sareeyo taasi oo lagu beddelanayo isla xisaabtanka la kordhiyay. Dugsiga madax bannaan waxaa lagu maamulaa Xeerka La Casriyeeyay ee Oregon (ORS) 338.

Waa maxay xiriirka ka dhexeeya dugsiyada madaxa bannaan iyo PSS?

PPS ayaa ka mas'uul ah kor kala socoshada iyo kormeerka dhammaan dugsiyada madaxa bannaan ee ay damaanad qaaday degmadu. PPS waxay ururisaa waxyaabaha sanadlaha ah ee la iskaga baahan yahay in la bixiyo, waxay la socotaa xasiloonaada maaliyadeed iyo waxqabadka ardayga, waxayna hubisaa in dugsiga madaxa bannaani uu u hoggaansan yahay sharciga iyo heshiiska.

Sidee ayuu ardaygu isku qoraa dugsiga madaxa bannaan?

Isqorista dugsiga madaxa bannaan waa in ay ahaataa mid caddaalad ah isla markaana loo siman yahay, waxaana laga yaabaa in ay ku kooban tahay da'da ardayga, heerka fasal ee ardayga, iyo booska bannaan ee jira. Haddii dugsiga madaxa bannaani uu helo codsiyo ka badan booska bannaan ee jira marka la eego heerka fasalka/fasalka la joogo, markaasi waa in loo sameeyaa bakhtiyaanasiib loo siman yahay si loo go'aamiyo isqorista heerka fasalka/fasalka la joogo.



Portland Arthur Academy
PUBLIC CHARTER SCHOOL